

# GURI IJAARASHADA

Macluumaadka Ijaaratada ee Queensland



Midowga Ijaaratada ee Queensland

Written by Annamarie A. Reyes

The Tenants' Union of Queensland is a community based organisation providing services for and representing the interest of residential tenants in Queensland.

## Acknowledgement

The Tenants' Union of Queensland is indebted to the members of the Project Reference group of the NESB Tenancy Law Publications Project and members of the Non-English speaking communities of Queensland. Their free time given and relentless effort to take the project to its completion gave birth to the booklet *"Renting a Home, Information for Tenants in Queensland"*.

THIS PROJECT WAS MADE POSSIBLE THROUGH THE FUNDING FROM THE HOUSING RESOURCE SERVICES PROGRAM OF THE GOVERNMENT DEPARTMENT, HOUSING QUEENSLAND.

Produced for the Tenants' Union of  
Queensland Inc.

By Sydney Language Centre (02) 9428 3353

Illustrations by Sue Wright

ISBN: 0577539 X

**c. Tenancy Forms (Foomamka Ijaaraadka)**

Form 1a or Form 1b – Entry condition reports.

Form 2 – Bond lodgement.

Form 3 – Transfer of Bond.

Form 4 – Refund of Rental Bond.

Form 6 – Change of Shared Bond Arrangement.

Form 9 – Entry Notice.

Form 10 – Notice of Lessor’s Intention to Sell  
Premises.

Form 11 – Notice to Remedy Breach.

Form 12 – Notice to Leave.

Form 13 – Notice of Intention to Leave.

Form 14a or 14b – Exit condition report.

Form 15 – Abandonment Termination Notice.

Form 16 – Dispute Resolution Request.

Form 17a or 17b – Renting in Queensland.

Form 18a or 18b – Model Tenancy Agreement.

(Foomamkan waxaad ka heli kartaa Heya’dda Ijaaraadka deegaanka, Websitekooda (Internetka) ama xafiisyada boostada ee Queensland).

**Tusmada buugga**

<b>1</b>	Waa sidee Deegaanka Australia	<b>1</b>
<b>2</b>	Helitaanka meel aad Ijaarato	<b>3</b>
<b>3</b>	Waxaad heshay meeshii aad Ijaarka ku dooneysay	<b>7</b>
<b>4</b>	Waxaadna heshay meeshii	<b>11</b>
<b>5</b>	Inta Ijaarashadu kuu socoto	<b>17</b>
<b>6</b>	Ma ka baxeysaa Ijaarka?	<b>25</b>
<b>7</b>	Helista lacagtaadii dibaajiga aheyd	<b>30</b>
<b>8</b>	Khilaafka Ijaarashada	<b>32</b>
<b>9</b>	Rabshada gudaha Guriga	<b>34</b>
<b>10</b>	Caawimaad dhaqaale	<b>35</b>
<b>11</b>	Xageed ka heli kartaa caawimaad dheeraad ah	<b>36</b>
<b>12</b>	Tixraac	<b>40</b>
	a. Weeraha( Kalmadaha) Wakiillada Guryaha	
	b. Eray bixin	
	c. Foomamka Ijaarashada	

Haddii luuqadda Ingiriisku kugu adag tahay waxaad caawimaad xagga luuqadda ah ka wici kartaa hawlaha Tarjimidda iyo Tarjumaadka (TIS) telefoonka ah 131 450. Caawimaad intaas ka sii dheer ee adeegyada kale ah waxaad ka heli kartaa buugan yar qeybta ah “ Xageed ka heli kartaa caawimaad dheeraad ah”.

## 1 Waa sidee Deegaanka Australia

Australia dad badan ayaa si toos ah guryohooda uga Ijaarta Milkiile-yaasha ama Wakiilada Guryaha.

Dadka qaar baa Ijaarta guryaha dowladdu leedahay. Guryaha nuucan oo kale ah waxaa loo yaqaannaa “Guryaha shacabka” “Heya,dda Hawlaha Guryaha” ama Mashruuca ka Ijaaridda shacabka.

Sida caadiga ah liiska sugitaanka guryaha dowladdu wuu dheer yahay.

Guri- yeelashadu waa arrin iska caan ah inkastoo kharajkeedu badnaan karo.



### ● Waa sidee Nuucyada guryaha kalee ee dadku ku nool yahay?

**Guryaha Kuleejada ah-** kuwaas oo aad qolal ka kireysato guri gaar loo leeyahay ama Dhismo u kala qeybsan qolal kala googo,an. Adeege ayaa deegaanka u xilsaaran, Jikada, Fadhiiga, Musqulaha iyo qalabka dhardhaqana waa la wadaagaa.

### Receipt (Rasiid)

Dokumiinti oo qoran oo lagu siiyo marka lacag aad siiso qof kale. Waxaad taas u keydisaa in ay caddeyn u noqoto lacagta aad bixisay.

### Referee (Garsoore)

Qofka doodaha Maxkamadda Eedaha yaryar dhageysta oo amarka rida.

### Rent (Ijaar)

Caddadka lacagta aad todobaadkii, labadii todobaad ama bishii siiso Milkiilaha ama Wakiilka guryaha oo guriga ka bixiso.

### Residential Tenancies Authority (RTA)

Heya'dda ijaaraadka degaanka (RTA)-waa hey'ad dowladeed, taas oo maamusha dibaajiyada kirada, bixisa macluumaadka ijaarashada, Xalisaa khilaafka u dhaxeeya kireystayaasha iyo Milkiilayaasha, waxey baartaa/soona oogtaa danbiyada ku xusan xeerka ijaarashada.

### Small Claims Tribunal (SCT)

Maxkamadda Eedaha yaryar(SCT) waa maxkamad sharci ee aan caam aheyn. SCTdu waxey go,aan ka gaartaa doodaha la xiriira Ijaaraadka.

### Special Term (Shuruuraadaha gaarka ah)

Shuruudo dheeraad ah oo ku jira heshiiska kirada oo Milkiilaha iyo Kireystuhu isla ogolaadaan oona u gaar kireysashadaas.

### Supported accomadation (Hoyga leysku taageero)

Hooy ay kooxo-Bulsheedyo siiyaan dadka u baahan.Inta badan muddo gaaban ama dhexdhexaad ah.

### Telephone Directory (Buugga Teleefoonada)

buugaag ay ku taxan yihiin magacyada, lambarada telefoonka iyo cinwaanada dadka, Ururada dowladda iyo ganacsi-leyduba\*. Magacyadu waxey isugu xigaan Alifbeeta ahaan. Waxaa bilaash lagu geeyaa guryaha dadka amase laga helaa xafiisyada boostada.

### Tenancy Agreement (Heshiiska Ijaarashada)

Heshiis u dhexeeya Ijaarte iyo Milkiile ama Wakiilada guryaha oo lagu kireysto guri deegaan ah.

### Tenant (Ijaarte)

Qofka ka kireysta guriga Milkiilaha oo ku qoran heshiiska kirada.

### Urgent Application (Arjiga deg-degga ah)

codsiyada aan u baahneyn in dhexdhaxaadin lagu diro Hey'adda ijaaraadka deegaanka oo si dhaqso leh looga dhageysto Maxkamadda Eedaha yaryar.

## b. Glossary (Eray bixin)

### Agreement (Heshiis)

Waa marka qof wax soo bandhigo oo qof kalena ogolaado.

### Breach (Ballan jebin)

Marka Ijaarlaha ama Kireystuhu ay fulin waayaan waajibaadkooda ku xusan heshiiska mudada ijaarka ama tan sharciga deegaanka ee mudada Ijaarka.

### By-laws (Sharci-hoosaadyo)

Sharciyada dheeraadka ah ee ku khuseeya marka laga reebo shuruudaha mudada Ijaarka haddii aad ku nooshahay guryaha sakad ahaanta u go,an ee isdulsaaran. Akhriso kuwaas koobi ka mid ah kuwaan. Weydiiso mid ka mid ah Milkiila-yaasha ama wakiilada guryaha.

### Compensation (Magdhaw)

Cadadka lacagta la siiyo Ijaar-laha ama Ijaartaha haddii khasaare kaga yimaado ballan- jebin heshiiska ah oo qofkood sababay awoodeed.

### Evidence (Caddeyn)

Macluumaad aad ku xaqiijineyso oraaah ahaan ah, qoraal ahaan ama masawirro iwm. Oo daliil u noqda hadalkaaga .

### Fixed Term Tenancy Agreement (Heshiiska kirada mudada go,an)

Heshiis kiro oo leh taariikh sugan oo bilow u dhamaad. Caadi ahaan 6 ama 12 bilood, noqonse karta muddo ka badan ama ka yar.

### Housing Recourse Service (Hawlaha adeegga guryaha)

Shaqaalaha xaafadaada kuwaas oo macluumaad iyo taageero kaa siin kara xagga dhibaatooyinka ijaarashada iyo guryaha. Waxey ku taxan yihiin Buugga telefoonada Xarafka “T” hoosteeda oo ah “Talada Ijaarashada”.

### Landlord (Milkiile)

eeg Ijaar-laha

### Lease (Ka ijaaris)

Eeg heshiiska Ijaarka

### Lessor (Ijaare)

Sidoo kale “Milkiile”. Waa qofka leh meesha, kaas oo ka ijaara kireyte/ yaasha.

### Periodic Tenancy Agreement (Heshiiska kirada ee wareega)

Heshiis kiro oo leh taariikh ay bilaabaneyso laakiinse aan laheyn dhamaad sugan. Sidoo kale waxay kiradaadu isku badaleysaa tan wareegta marka heshiiska kirada mudada go,an kaa dhamaado oo aadan saxiixin heshiis cusub gurigase aad sii degenaato adigoo ijaarkii weli bixinaya.

### Real Estate Agent (Wakiilka guryaha “REA”)

qof Milkiile u xilsaaro in uu meesha kirada ah u maamulo oo kirada uga qaado . Milkiiluhu wuxuu hawshan lacag ku siiyaa Wakiilka Guryaha.

**Barrinka Aqalada la jiido-** Barrinada aqalada la jiido iyagaaba leh aqaladaas. Aqalka la jiidaa waa guri yar oo lala guurguuro oo leh hawlfududeeyayaal sida Jiko yar/meel lagu cunteeyo iyo meel la seexdo. Musqusha iyo qalabka dhardhaqa waa la wadaagaa. Qanuunada kireystayaasha aqalada la jiido wey kala duduwan yihiin, sidaa darteed ka feejignoow u isticmaalka buuggan oo hadaadan hubin kala tasho dad kale.

**Deegaanka Bulshada-** waa deegaammo dowladdu maalgeliso oo ay ururro bulsheedyo maamulaan. Sida badan Ijaaratadu waxey ka mid noqon karaan maamulka deegaankooda.

Hoyga dedegga ah- Guryaha nuucakan ah waxaa loogu tala galay dadka kadeedan ama aan hoyga heysan.

## ● Xaquuqdaada marka aad Ijaaraneyso

Queensland Waxaa ka jira sharci la yiraahdo Xeerka Ijaarashada Deegaanka. Waxaa ku xusan xaquuqda iyo masuuliyadda kireystaha, Milkiilaha iyo wakiilada guryaha. Sharcigan wuxuu khuseeyaa dadka guryaha gaarka loo leeyahay ijaarta , kuwa Ijaarta guryaha shacabka ama dowladda, Ijaarka aqalada la jiido ee barrin ku yaalla ama Jardiin. Kuwa degan guryo laga leeyahay halka ay ka shaqeeyaan ama ku nool deegaamada taageerada ah in ka badanmuddo 13 todobaad ah.

Ma khuseeyo dadka dalxiis ahaanta u kireysta, xaafadaha lagu nasto(hawlgabka), Isbitaalada iyo guryaha xanaanada , Machadyada waxbarashada, deegaamada xaaladaha dedegga ah iyo kuwa mudada yar lagu jiro qaarkood iyo kuwa ku nool kuleejooyinka iyo guryaha habeen-dhaxa loo dego.

Xusuusin: haddii aad ku nooshahay guri kuleej ah ama kuwa habeen-dhaxa loo dego oo dibaaji aad bixiso, inkastoo sharcigakani wax badan uusan kaa daboolayn, Milkiilaha ama maamuluhu waa in carbuuntaada ay dhigaan Heyadda Ijaaraadka Deegaanka (RTA).

## 2 Helista meel aad Ijaarato

### Waxa ugu horeeya oo aad ka fakareyso.

Imisa ayaad awooddaa lacag Ijaar ah todobaadkii, labadii todobaad ama bishii in aad bixiso?

Meeshu ma u dhawdahay shaqadaada, dukaamada, Dugsiga ama Isbitaalka mase u dhawdahay gaadiidka sida basaska ama Tareenada?


Ma waxaad dooneysaa guri alaab taallo mase mideysan oollin?

Imisa qol ayuu ka koobnaan?

Milkiilayaasha iyo wakiilada guryuhu waxey xadidaan inta qof ee guriga kuwada noolaan kara iyagoo u eegaya inta qol ee uu ka kooban yahay.

### Sideen ku helaa meel aan dego?

Ka fiiri wargeysyada “Guri Kiro ah”. Guryo isdul-saaran oo kiro ah”, “Qolal kiro ah”, “Guryo wadaag ah”, ama qeybta “Kuleejka iyoDeegaanka”. Caadiyan wargeysyada soo baxa sabtida ayaa soo qora meelo badan oo la kireynayo.



Meelaha guryaha isdulsaaran iyo guryaha kale ku yaalliin waxaa loo soo qoraa sida xarfaha Alifbeetadu isugu xigaan. Haddii aad dooneyso in Annerley aad ka ijaarato, waxaad akhrineysaa biloowga liiska xaarafka “A”da hoosteeda: Hadiise ay ku taallo Zillmere waxaad ka fiirineysa “Z” hoosteeda. AMA

## 12 Appendix (Tixraac)

### a. Real Estate Terms Shuruudaha Wakiilada guryaha

p/f	part furnished	Qeyb ahaan goglan
f/f	fully furnished	gebi ahaan goglan
n/s	non-smoking	Aan sigaar lagu cabbi karin
cls tpt	close to public transport	Ku dhaw gaadiidka guud
t'house	townhouse	Guri ka kooban qeyb kore iyo qeyb hoose
b.ins	built in wardrobes	Armaajooyinka dharku ku dhisan yihiin
l.u.g or l.u.	lock up garage	Garaash la xiro leh
bk	brick	Bulukeeti
brm	bedrooms	qolal Jiif
locn	location	Halka meeli ku taal
\$_pw	amount of rent per week	Inta Kiradu tobobaadkii tahay weyn
lge	large	Katiifad
cpts	carpets	dabool hoose
u/c	under cover	gooni u taagan
s.c.	self-contained	Meel hoosaad
l/s	low set	Deyd ku wareegsan yahay
f'fenced	fully fenced	Lambarka telefoonka shaqada
ph(w)	telephone number at work	Lambarka telefoonka guriga
ph(h)	telephone number at home	

### Abbreviations (Erayo lasoo gaabshay)

REA	Real Estate Agent	Wakiilada Guryaha
RTA	Residential Tenancies Authority	Heyadda Ijaaraadka Deegaanka
SCT	Small Claims Tribunal	Maxkamadda Eedaha yaryar

(Sharaxaad dheeraad ah ka eeg Eray-Bixinta).

TOWNSVILLE & REGION  
Townsville Housing Resource Unit  
Phone (07) 4772 5617

WHITSUNDAYS  
Tenancy & Housing Info Service – Whitsunday  
Phone (07) 4946 6449

CARAVANS  
Caravan & Mobile Homes Residents Assoc  
(CAMRA)  
Phone (07) 893 0733 / 1800 061142

Haddii wax dhibaato ah aad kala kulanto xagga luuqadda adeegaas kala xiriir telefoonka ah 131 450

RESIDENTIAL TENANCIES AUTHORITY  
Phone: (07) 3361 3611 or 1800 177 188

DEPARTMENT OF HOUSING (WAAXDA GURYAHA)  
Telafoon: (07) 3227 7111  
Xafiisyada Xaafadaha ka raadi buugga telefoonada gudihiisa “Waaxda hawlaha Bulshada iyo Guryaha”

ANTI-DISCRIMINATION COMMISSION OF QUEENSLAND  
Telafoon: (07) 3239 3365

CENTRELINK  
Su,aalaha lagu weydiinayo luuqadaha aan Ingiriiska aheyn  
Telafoon: 13 12 02

Adeegga muhaajiriinta ee Xaafadaada kala xiriir  
Telafoon: (07) 3844 6080 Fakis: (07) 3844 6694

DOMESTIC VIOLENCE TELEPHONE SERVICE  
Phone: 1800 811 811

Waxaad la xiriiri kartaa Wakiilada Guryaha (Real state Agency). Waxey maamulka guryaha u qaabilsan yihiin Milkiile-yaasha, waxeyna soo qoraan meelaha la Ijaarayo. Taleefoonadoodu waxey ku yaalaan, buugga Taleefoonada, Wakiilada Guryaha “Real state Agency” hoostiisa.

*Hadii wax dhibaato ah aad la kulanto, wac adeegayaasha muhaajirka ee xaafadaada oo ku qoran qeybta “Xageed ka heli kartaa caawimaad dheeraad ah”.*

### ● Siyaalaha kale ee guryaha lagu helo

Haddii aad dooneyso in aad dalbato guryaha shacabka ama dowladda la xiriir xafiiska kuugu dhaw ee waaxda guryaha ee Queensland. Ka fiiri Buugga Taleefoonka. Badanaaba Ijaarkoodu waa raqiis waxaase la sugaa waqti dheer. Hase ahaatee dalabka magacaaga ku qor waa intaas oo Waaxda ogolaasho guri kaaga soo baxaaye.

Waaxdu waxey kuu qaban kartaa Turjumaan.

♥ Oraah talo ah

La socodsii Waaxda Guryaha haddii aad bedesho cinwaankaaga inta aad ku jirto liiskooda sugidda, si aadan u seegin kalkaaga laguugu ogolaanayo guriga.

### ● Marka aad raadineyso meelo aad ijaarato.


Marka aad guri raadineyso, hore u biloow raadinta maadaama meelaha intooda badan dhaqso loo dego. Ha niyad jabin, haddii aadan helin meesha ugu horeysa oo aad arkooto. Waana muhiim in meesha aad si fiican iskaga hubiso inta aadan qaadan.

Caawimaad ahaan usoo kaxeeyso qof qoyskiinna ka mid ah ama saaxiib, Buugga Jidadka si aad u hesho meelaha aadan ku aqoonin basaska, Tusaha waqtiga Doomaha iyo Tareenada si ay kuugu sahasho tegista meesha haddii aadan baabuur laheyn.

Milkiilaha ama Wakiilka Guryaha (Real estate agent) ayaa marmarka qaar kusoo tusaya ama fure ku siinaya si aad isaga soo aragto guriga. Waxaa suurto gal ah in aad furaha ka bixiso carbuun qiyaastii ah 50 dolar. Iska hubi in aad ka qaadato Rasiid. Marka aad soo celiso furaha ayaad dib u qaadan kartaa lacagtaada.

● **Iska hubi inta aadan Ijaaran.**

Si taxadar leh wax kasta iskaga hubi , inta aadan qaadan guriga.



**GOLD COAST (SOUTH)**  
Gold Coast Housing, Information & Tenancy Service  
Phone (07) 5598 3230

**GYMPIE/SOUTH BURNETT**  
Cooloola Community Housing  
Phone (07) 5482 7623

**HERVEY BAY/MARYBOROUGH**  
Fraser Coast HRS  
Phone (07) 4124 1523

**MACKAY**  
Mackay HRS  
Phone (07) 4957 6334

**MT ISA/NORTH WEST REGION**  
Mt Isa HRS  
Phone (07) 4743 9659 / 1800 671202

**ROCKHAMPTON/CENTRAL HIGHLANDS**  
Central Qld HRS  
Phone (07) 4922 7411

**ROMA & DISTRICT**  
Roma & District Community Support Assoc  
Phone (07) 4622 3644 / 1800 620663

**SUNSHINE COAST**  
Sunshine Coast Regional Housing Council  
Phone (07) 5476 0555

**TOOWOOMBA & REGION**  
Toowoomba Housing Resource Service  
Phone (07) 4632 2413

LOGAN/NORTH ALBERT – BEAUDESERT  
 Logan River Valley Housing Hotline  
 Phone (07) 3208 8736

OUTER NORTHERN SUBURBS  
 Housing Referral & Resource Service  
 Phone (07) 3865 1100

OUTER SOUTHERN SUBURBS  
 Acacia Ridge Community Support Group  
 Phone (07) 3277 7583

**REGIONAL (GOBOLADA)**

ATHERTON TABLELANDS  
 Tableland Housing Information Service  
 Phone (07) 4091 3128

BOWEN  
 Bowen HRS  
 Phone (07) 4786 3735

BUNDABERG & SURROUNDS  
 Bundaberg Housing Action Group  
 Phone (07) 4153 2957

CAIRNS & SURROUNDS  
 Access Community Housing  
 Phone (07) 4031 6733

GLADSTONE & REGION  
 Gladstone Housing Resource Service  
 Phone (07) 4970 1260

GOLD COAST (NORTH)  
 Gold Coast Housing, Information & Tenancy  
 Service  
 Phone (07) 5591 1102

Ma xafidan yahay, qataarro wanaagsan ma leeyihiin albaabada iyo dariishaduhu?

Meeshu ma leedahay Biyo galin haboon?

Ma shaqeynayaan biyo raaciska iyo Tubooyinka Musqushu?

Meel biyo deyneysaa ma jirtaa?

Nadiif ma tahay qaabkeeda guudna ma wanaagsan yahay?

Makiinadda cuntadu ma shaqeynaysaa?

Leynkii taleefoonku ma ku jiraa?

♥ Oraah talo ah

Haddii wax ka haleysan yihiin guriga oo aad dooneyso in aad degto weyddii Milkiilaha ama wakiilada Guryaha in ay sameynayaan. Haddii ay ogolaadaan xaqiiji in ay qoraal ahaato.

Haddii aadan jecleysan meesha waa caadi in aadan qaadan. Is-weyddii inta aadan meesha qaadan, Run ahaan meeshani ma tahay meel aan doonayo in aan ku noolaado?

● **Qaraamaadka kale ee aad ku talo-galeyso**

Lacag meel u dhig kharajka rarka. Bixinta Kirada iyo Dibaajiga ka sokoow( caadiyan u dhiganta kirada 4todobaad), Waxaa laga yaabaa in aad lacag ku bixiso rarka alaabtaada. Waxaa kale oo laga yaabaa in korontada, gaaska iyo telefoonka magacaaga aad ku soo xirato oo kharajkooda aad bixiso.

Alaabaha guriga looga dhaqmo sida Digsiyada, birtaawada, jikada iyo maacuunta cunada, busteyaasha iyo mararka qarkood daahyadaba adiga ayaa keensanaya. Waa suurto gal in aad raqiis ku hesho alaabaha guryaha la dhigto amaba bilaash kaga hesho qaar ka mid ah ururada sadaqada bixiya sida St Vincent’s de Paul.

### 3 Waxaad heshay meeshii aad Ijaarka ku dooneysay

#### Sida loo codsado

Waxaa laga yaabaa in lagu weydiisto in aad buuxiso foom codsi ah. Foomka waxaa lagu weydiinayaa faaf-faahin ku saabsan dakhligaaga, Ijaarayaashadii hore iyo faah-faahinno kale oo naftaada ah.

Khasab ma, ahan in su,aalahaas oo dhan aad ka jawaabto laakiin hadaadan ka jawaabin waxa laga yaabaa in ay saameeyso fursadahaaga helitaanka guriga.

Waa suurto gal in aqoonsi lagu weydiyo. Waxaad u adeegsan kartaa Leysin baabuur, warqadda dhalashada, Medicare, kaarka caafimaadka, tixraac ka yimi Ijaarayaashii hore ama aqoonsiyada kale eed haysato.

Haddii aad dhawaan timid Australia waxaad la xiriiri kartaa shaqaalaha Jaaliyada si warqad taageero ah uu kuugu qoro.



### 11 Xageed ka heli kartaa caawimaad dheeraad ah

Hawlaha Turjumidda Telefoonka  
TRANSLATING AND INTERPRETING SERVICE (TIS)

Haddii wax dhibaato ah aad kala kulanto xagga luuqadda adeegaas kala xiriir telefoonka ah 131 450.

URURKA IJAARLEYDA EE QUEENSLAND–BRISBANE  
Waxey caawimaad iyo talo ka bixiyaan arimaha sharciga ee ijaarashada

28 Robertson St. The Valley  
Khadka Telefoonka talada: (07) 3257 1108 ama 1800 177 761  
( banaanka Brisbane keliya)  
Talada Ijaarashada Isniin - Jimce 9ka subaxnimo -4ta Galabnimo

XAFIISKA WAQOYIGA QUEENLAND EE CAIRNS  
Khadka taleefoonka talada: (07) 4031 3194

HAWLAHA AGEEGGA GURYAHA  
Shaqaalaha xaafadaada ee ku siin kara caawimaad iyo macluumaad la xiriira ijaarshadaada iyo dhibaatooyinka guryaha:

BRISBANE AREA (EE AGAGAARKA BRISBANE)

BRISBANE NORTH REGION  
Near North Housing  
Phone (07) 3888 3577 - 1800 809700

INNER NORTHERN SUBURBS  
New Farm Neighbourhood Centre  
Phone (07) 3358 3951

INNER SOUTHERN SUBURBS  
West End Community House  
Phone (07) 3844 9814

IPSWICH & SURROUNDS  
West Moreton Housing Resource Service Inc  
Phone (07) 3281 5409

## 10 Caawimaad dhaqaale

### Deymaha Dibaajiga

Haddii aadan heysan lacag kugu filan oo aad iskaga bixiso dibaajiga waxaad ka codsan kartaa xafiiska laanta Guryaha ee ku yaalla xaafadaada in dibaajiga ay ku deymiyaan. Waa in aad codsataa inta aadan ku guurin.

Dabeed bil kasta ayaa lacag bixinaysaa ilaa iyo inta lacagtii oo dhan aad ka bixineysid.

### Deeqda Kirada

Haddii lagu siiyo dibaajiga deynta ah waxaa suurto gal ah in aad xaq u yeelato kiro deeq ah. Waa deeq mar keliya la bixiyo oo ah laba todobaad kirada gurigaaga cusub oo aan laga rabin soo celinteeda.

Si aad u codsto la xiriir xafiiska laanta guryaha ee ku yaal xafadaada.

### Gargaarka Ijaarka

Waxaad kala xiriiri kartaa Centrelink si aad u ogaato in xaq aad u leedahay gargaarka ijaarka- Tani waa lacag lagu caawimo kiro bixinta haddii dhaqaalaha kusoo galaa yaryahay. Lacagta lagu siinayaa waxey ku xiran tahay inta kirada aad bixisaa dhan tahay, in aad leedahay caruur iyo dad kugu tiirsan.

In aad hubto in aad dooneyso guriga mooyaane ha buuxinin foomka arjiga. Marka aad buuxiso codsiga, hadana waa in aad ka warsugtaa in Milkiilaha ama wakiilku ogolaado inta aadan usoo guurin guriga. Haddii la ogolaado codsigaaga, waxaa laga yaabaa in waajib ay kugu noqoto in aad aqbasho ijaarashada, haddii aad ka noqotana bixiso kharaj dheerad ah.

Haddii markii aad warqadda codsiga u gudbisay Milkiilaha ama wakiilka guryaha ka dib aad ka noqoto degista guriga, telefoon usoo dir una soo raaci markiiba warqad qoraal ah oo aad ku xaqiijineyso ka noqoshadaada.

Haddii inta aysan kuu ogolaanin aad ka naqoto guriga waajib kugu noqon mayso ijaarashadu.

### Kharajka Arjiga

Waa laga yaabaa in lagu weydiyo bixinta kharajka arjiga. Kharajkan laguma goynin sharciga Ijaarashada ee Queensland. Waa muhiim in Rasiid aad ka qaadato.

#### ● Maxaa ku dhacaya kharajkan?

- Haddii aad hesho guriga lacagtaani waxey raaceysaa ijaarka ama dibaajiga.
- Haddii codsigaaga aadan ku guuleysan ama ka noqoto inta aan la ansixin codsigaaga, lacagtaadu wey kuu soo noqoneysaa.
- Haddii la ogolaado codsigaaga laakiin aadan dooneyn in aad aqbasho, waxaa laga yaabaa in ijaaruhu lacagtaada heysto oo dabcan lacag ka sii badan oo magdhaw ah dalbado. Xaaaladahan kala xiriir qof ku jira liiska qeybta ah “Meesha aad caawimaad dheeraadka ka heli kartid”

## Carbuunta Xajinta(bee-xirka)

Carbuunta beec-xirku wey ka duwan tahay carbuunta furaha ama kharajka codsiga. Waa lacag aad u bixiso in ay fursad kuu siiso keligaa in aad gasho heshiiska Ijaarka guriga. Mudadan ay carbuunta beec-xirka kaa hayaan Milkiilaha ama Wakiilka gurigu kama ijaari karo qof kale guriga.

Haddii waqti cadd aan laguugu qorin Rasiidka, waxaad heysataa 48 saacadood in aad ku ogeysiiso Ijaaraha in aad guriga dooneyso iyo in kale. Waa in aad ogeysiisaa ijaaraha go,aankaaga inta waqtiga beec-xirku uusan dhamaanin. Haddii aadan la socodsiiin, lacagtaasi kuu soo noqon mayso.

Waa sharci darro lacagta lagaa hayo haddii aan Rasiid lagaa siinin.

## Takooid (Cunsuriyeyn)

Australia waa sharci darro in dadka la kala takooro iyadoo loo eegayo guur ahaan, in ay uur leeyihiin, caruur leeyihiin ama lab iyo dhedig key yihiin, jinsiyad/ dhalasho, da' , Jilicsanaan/ cuuryaanimo, diin, siyaasad, rumeyn/ nashaad ama isutagga uu sameeyo.

Waa arin sharciga ka horjeedda haddii Milkiile ama wakiil guri kuugu diido qodobadaan awgood.




## 9 Rabshada Guriga gudahiisa

Australia waxaa ka jira sharciyo ka horjeeda dhaqanka falfalxumada iyo rabshada leh ee kaaga yimaada qofka aad isqabtaan ama qofka aad saaxiibnimada kuwada degan tihiin. Rabshada gudaha guriga waxaa ka mid ah ninkaada /xaaskaaga ama saaxiibka aad wada nooshihiin oo ku dhaawaca ama kuugu hanjaba in dhaawac uu idin gaarsiin doono adiga ama qoyskaaga oo idin cabsi geliya ama idin kadeeda, ama kuu geystay xad gudub jir ahaan, maskax ahaan, qalbi ahaan ama waxyeeleynaya hantidaada.

Ijaarte ahaan waxaad qaadi kartaa talaabo aad uga saareyso qofkaas rabshoolaha ah guriga aad degan tahay ama waxaad uga guuri kartaa rabshadaas gudaha awgeed.

Si aad mid ka mid ah talaabooyinka u qaaddo waxaad codsi dedeg ah u dirsan kartaa Maxkamadda Eedaha yar-yar. Waxaad keeneysaa wax caddeynaya rabshadaas gudaha.

Caawimaad dheeraad ka wac talefoonka hawlaha rabshada gudaha oo lacag la,aanta ah 1800 811 811 ama ururada buugan dhabarkiisa ku taxan.




Haddii aad hore ugu sii sheegtana maxkamaddu waxey kuu qabaneysaa turjumaan.

Qofka gaara go,aanka maxakamadda waxaa la yiraahdaa “Garsoore”. Aragtida labada dhinac ayuu/ayeey dhageysanayaan ka dibna amar ku bixinayaan wixa la yeelayo, Tusaale ahaan; gabagabeeynta cahdiga kirada, dayactir sameynta,ama kharajkii u celinta, waxa leysku khilaafsan yahay ayey ku xiran tahay.

● **Maxey tahay meesha lagu keydiyo magacyada “Kireystaha xun”**

Meesha magacyada kireystaha lagu keydiyo marmar waxaa loo yaqaan “ Liiska madoow ee Kireystaha”. Waa liis kireystayaasha wadanka ka kooaban, kuwaas oo ay wakiilada guryuhu u arkaan “khatar xun”.



Wakiiladaa guryuhu waxey awood u helaan ogaashaha in kireystuhu uu liiska ugu qoran yahay “khatar xun” ama weyba ku dari karaan kireyste liiskaas.

Mararka qaarkood kireystuhu warbixintooda xaruntan keydka kama ogaan karaan, ama loomaba sheego in ay xarunta keydka ku jiraan, ama waa loogu hanjabaa in la geliyo, ama waxaa la geliyaa liiska haddii ay xaqooda kireystenimo isticmaalaan.

Haddii aad liiskaas xarunta keydka ku jirto waxaa suurto gal ah in codsigaaga ijaarashada la diido.

Haddii ay kugu timaaddo dhibaatooyinka xarunta keydka Ijaartayaasha, la xiriir ururada ku taxan dhabarka buugan.

Tusaaleyaal takooridda sharci darada ah:

Haween muslim ah ayaa lagu yiri deegaanku ma banaana hadana maalintii ku xigtay ayaa la xayey siiyey.

Qoys Aborigin ah ayaa la yiri ka keena tixraac Ijaarayaashiinnii hore halka aan laga weydiinin qoyskii aan Aboriginka aheyn.


Laga soo xigtay: xeerka Gudigga ka horjeeda Cunsuriyadda, Taxanaha lambarka 6aad.

● **Go,aanada Ijaaraha**

Ijaaraha ayaa go,aaminaya inta qof ee ku noolaan karta hoyga, in aad guriga usoo guuri karto iyo in kaleba. Waxa kale oo laga yaabaa in hubsasho ahaan ay ula xiriiraan Ijaarlayaashii aad hore uga kireysatay iyo keydka ijaarlayaasha in magac- xumo kuugu jirto.

Haddii guriga ay kuu diidaan waxaad weydiineysa sababta.

Haddii aad u maleyneyso in sababtu tahay takoorid, la xirrir gudiga ka horjeeda takoorka (Cunsuriyadda) ee Queensland ama la hadal shaqaalaha jaaliyadda ee ku liisgareysan qeybta “ Halka aad ka heli karto caawimaad dheeraad ah”.



## 4 Marka aad hesho hoyga

### ● Heshiiska ijaarka deegaanka ama cahdiga

Marka Milkiile ama wakiilada guryuhu kula socodsiiyaan in ay guriga kaa ijaarayaan waa in ay ku siiyaan cahdi aad saxiixdo. Waa muhiim in aad akhriso oo fahamto dukumiintigaas. Cahdigu waa dukumiinti sharci ah. Marka aad saxiixdo waad u hogaansantay.

Heshiiska waxaa ku cad shuruudaha caadiga ah ee ijaaraadka oo dhan waxaa lagu dari karaa shuruud kasta oo gaar ah oo ijaaraha iyo ijaartuhu ku heshiiyaan sida caws jarka ama qaadista qashinka.



Shuruudaha waad kawada xaajoon kartaan hase yeeshee waa in aysan ka hor imaan sida sharcigu dhigayo.

Haddii aad dooneyso in aad qaadato dukumiintiga oo soo akhriso oo uu diido Ijaaruhu dabeed maanka geli in aad meel kale ka raadsato.

Marka lagu siiyo dukumiintihga waxaad heysataa 5 maalmood in aad isagoo saxiixan ugu celiso ijaaraha. Markhaatina wa inuu saxiixaa. Dabeed ijaaruhu waa in uu kuugu soo celiyaa 14 maalmood gudahood nuqul (koobi) saxiixan.

## 8 Khilaafka deegaanka

haddii aad u maleyneyso in ijaaruhu uu jebinayo heshiiska, tusaale ahaan; sameyneynin makiinada cunnada lagu kariyo ama iska soo gelayo digniin la,aan, waxad u diri kartaa Digniin khalad saxid ah taas oo siinaysa 7maamood in ay ku hagaajiyaan heshiis ka baxa.

Haddii waqtigaas ay ku hagaajin waayaan, RTA-Da ayaa ku xereyn kartaa foomka codsiga xalka khilaafka. Waxey qabtaan kulan dhexdhexaadin ah, caadi ahaan taleefoon si ay kaaga kaalmeeyaan sidii aad heshiis ula gaari laheyd Ijaaraha.

Haddii aad adiga iyo ijaaruhu heshiin weydaan, RTA-Du waxey kuu soo direysaa digniin la xiriirta khilaafka la xalin waayey taasna waxaa ku dalban kartaa dhegeysi maxkamadda Eedaha yar-yar.

Haddii aad jebiso dhankaaga nidaamkaas oo kale ayuu ijaaruhu sameyn karaa. Haddii aad hesho digniin khalad sax ah oodan ogolaanin, waxaad heysataa 7beri in aad kaga doodo adigoo dalbanaya xalka gaaridda khilaafka.

### ● Maxkamadda eedaha yaryar

Haddii dhibaatooyinka Ijaarashada lagu xallin waayo hababka kor lagu soo xusay talaabada xigtaa waa in aad ka dalbato SCT in ay dacwadda dhegeystaan. Xaaladaha qaar codsi deg-deg ah ayaa lagu weydiisan karaa dacwad dhegeysiga maxkamadda Eedaha yar-yar. Taas waxaa laga wadaa in aadan u baahneyn in aad codsato xalka-ka gaaridda khilaafka inta aadan dalban dacwad dhageysiga maxkamadda Eedaha yaryar.

Guud ahaan qiime-badan ma joogto in eedeyn lasoo gudbiyo qofnana looma ogola in uu qareen adeegsado. Hase ahaatee, waxaad si caawimaad ah u weydiisan kartaa shaqaalaha Jaaliyadda ama qof kale in ay ku soo raacaan.

● **Maxey Ijaaraha iyo wakiilada guryuhu ka qaadan karaan dibaajigaaga?**

- Kiraddii aan la bixin intii aad deegaanka ku jirtay;
- kharajka waxyeelada ay sababeen kireystaha ama martidoodu;
- kharajka nadiifinta deegaanka ama deyrka haddii kireystuhu ka dhigi waayo sidii meeshu aheyd markii ay soo degeen.
- kharajka ijaaraha loo gudayo haddii kireystuhu jebiyo heshiiska, tusaale ahaan; lacagta dib u kireynta, kirada luntay iyo kharajka xayeysiinta.

Waad ka doodi kartaa wixii kharaj ah oo aadan ogolaanin.

Dibu-cusbooneynta iyo rinjiyeynta, tusaale ahaan; masuul kama saarna ijaartaha in waxyeelada ay geysteen ayaga iyo martidoodu mooyane. Tani waxey qeyb ka tahay ku dhaqanka guud ee guriga, waana masuuliyadda Ijaaraha. Kharajyadan lagama goosan karo dibaajiga.

Haddii dibaajigaaga uu ku dhago ijaarlahaagii hore la xiriir mid ka mid ah dadka ku taxan liiska ah:  
 “Xageed ka heli kartaa caawimaad dheeraad ah”.

♥ Oraah talo ah

La socodsii RTAda cinwaankaaga cusub si ay kuu soo gaarto marka ay 48 saac kuugu soo celiyaan dibaajigaaga.

● **Ma dooneysaa in dibaajigaaga aad u wareejiso meel cusub?**


Waxaad ku wareejin kartaa in aad foomka RTAda ee wareejinta dibaajiga buuxiso. Iskana xaqiiji in adiga, Ijaaraha ama wakiilada guryuhu saxiixaan Dibaaji leysku heystana ma wareejin kartid.

Hadii aad taageero xagga dibaajiga ah u baahan tahay, la xiriir meelaha liiskoodu ku taxan yahay qeybta ah “ Xageed ka heli kartaa cawimaad dheeraad ah”.

Haddii aad degto guryaha sakadaha ah ee isi-saarka ah waa in aad weydiisaa haddii ay jiraan sharci-hoosadyo u degsan, maadaama laga yaabo in uu jiro qaanuun u gaar ah; tusaale: In xayawaan lagu heysan karo ama dharka meelo aan la surin jiraan.

● **Maxaa dhacaya haddii aan lagu siin heshiiska deegaanka oo qoran.**

Ijaaraha waa xil saaran in uu kula galo heshiis qoran. Haddii uusan ku siinin weli sharciga ayaa ku ilaalinaya.



● **Maxay yihiin qeybaha muhiimka ah ee heshiiska Ijaaraarkaagu.**

Waxyaabaha soo socda waa iney ku yaalaan heshiiska Ijaarashada:

1. Magaca Ijaartaha, Milkiile-ha iyo wakiilka guryaha
2. Cinwaanka meesha aad kireysaneyso iyo in alaabi taalo iyo in kale.
3. In heshiisku yahay muddo go,an ama muddo wareegto ah\* (eeg hoos)
4. Inta aad kiro bixineyso iyo inta jeer eed bixineyso markiiba
5. Meesha iyo sida kirada loo bixinayo
6. Inta aad Dibaaji u bixineyso
7. Heshiisyo, haddii ay jiraan ku saabsan kharajka Gaaska,. Biyaha ama Korontada
8. Shuruudaha khaaska ah, tusaale ahaan caws Jarka, Jardiinka ama xayawaan heysashada.

- \* *Heshiiska mudada go,an-* Marka heshiiska leeyahay biloow cad iyo taariikh dhamaad
- \* *Heshiis mudada wareegtada ah-* Marka heshiisku leeyahay biloow cad laakiin uusan laheyn taariikh dhamaad.

*Deegaamo badan ayaa ku biloowda heshiiska mudada go,an. Marka mudadaasi dhamaato hase yeeshee aad sii degenato meesha ijaarkaagu wuxuu noqonayaa mig wareega.*

♥ Oraah talo ah

Si aad u aragto heshiiska Ijaarku sida uu yahay waxaad nuqul(koobi) heshiiska caadiga ah ee deegaanka ka heli kartaa xafiiska boostada ee ku yaalla xaafadaada ama Heya'dda Ijaaraadka deegaanka (RTA).  
Ma ahan in wakiilada gurayaha oo dhami isticmaalaan foomkan oo kale laakiin kuligood shuruudaha waa iskaga mid.

### ● Bixinta dibaajiga iyo Ijaarka

Waaa maxay dibaaji?

Ijaaraha ama wakiilada guryuhu waxey caadiyan ku weydiisanayaan inaad bixiso lacag horumarin ah si ay u daboolaan dhaqaale ahaan haddii aad ijaarka bixin weydo ama meesha waxyeelleysa.

Marka aad dibaaji bixiso Ijaaruhu waa inuu 10-maalmoood gudahood ugu gudbiyaa Heyadda Ijaaraadka Deegaanka (RTA-da) isagoo soo raacinaya foomka lagu xereeyo dibaajiga oo labadiinuba aad saxiixdeen. Haddii aysan sameynin sidatan waa sharci darro.

Tirada Dibaajigu kama badan karto 4-todobaad oo Ijaar ah iyadoo aad bixiso in ka badan 300 oo dolar todobaadkii oo ijaar ah mooyaane.

## 7. La soo noqoshada lacagtaadii dibaajiga aheyd

Haddii adiga iyo Ijaaruhu aad ku heshiisaan in lacagtaadii dibaajiga aheyd aad qaadato waxaad wada buuxineysaan oo saxiixeysaan foomka lacag-celinta dibaajiga marka aad guriga ka guurto.


Waxaad foomka u diri kartaa RTAda ama geyn kartaa xafiiska boostada. Haddii aad geyso xafiiska boostada waa inaad heysataa aqoonsi sida baasaboora, leysin baabuur oo sawir leh, kaarka amaahda ama kaararka bangiga markiibana hore ayaa lagaa siinaya (lacagta).

### ● Ka waran hadii adiga iyo ijaaruhu aad ku heshiin weydaan sida loo bixinayo dibaajiga?

Haddii adiga iyo ijaaruhu aad ku heshiin weydaan sida dibaajiga loo bixinayo sida ugu dhakhsaha badan ee ay kuugu suurto gelayso ugusoo dir RTDa foomkaaga lacag-celinta dibaajiga oo saxiixaaga leh xataa haddii ijaaruhu saxiixi waayo.

Haddii RTAdu marka hore hesho foomkaaga ijaaruhu wuxuu heystaa 14maalmoood oo uu kaga doodo sheegashadaada, haddii kalese dibaajiga adiga ayaa lagu siinayaa. Sidoo kale haddii foomka Ijaaruhu gaaro ugu horeyn halkaas ka dib waa in doodda aad ka qabto 14maalmoood foomka codsiga xalka khilaafka kusoo gudbisaa, haddii kale ijaaraha ayaa dibaajiga la siinayaa.

Waxaad caawimaad ka heli kartaa meelaha liiskoodu ku taxan yahay dhabarka buugan.



Ka dib Ijaaruhu waa in uu qeytiisa ku buuxiyaa 3maalmoood oo uu kuugu celiyaa foomka cinwaanka aad kasoo dirtay.

Aad ayey muhiim u tahay in foomkan la buuxiyo. Wuxuu kuu noqonayaa caddeyn haddii lacagtaadii dibaajiga aheyd dib ula noqoshadeeda muran kaa galo.

● **Waxyaalaha kale ee aad xusuusnaaneyso marka aad guureyso**

Maalinta kuugu danbeysa kirada celi furayaasha haddii kalese waxaa suurrowda in ijaar dheeraad ah lagugu soo dalacdo.

Nadiifinta katiifadda- qaanuunku wuxuu dhigayaa in marka guriga aad ka guureyso uu la mid ahaado sidii markii aad soo degeysay oo kale. Haddii katiifadda loo nadiifiyey xirfad ahaan markii aad soo degeysay adiguna waa in sidaas oo kale aad yeeshaa marka aad ka guureyso.

Cayayaan ka dilis - Sida caadiga ah masuul kama ihid, ka dilista cayayaanka hase ahaatee haddii aad ku heysatay xayawaan guriga waa in aad ka buufisaa boodada. Koobi uga bixi Ijaaraha wixii rasiid ah ee kaaga baxay nadiifinta ama cayayaan ka dilista guriga.

♥ Oraah talo ah

Dhamaadka Ijaarka waxaad guriga qaadi kartaa sawir ama geyn kartaa saaxiib ama deriskaaga si ay u arkaan inta aadan furaha celin. Taasina waxey caddeyn kuugu noqon kartaa xaalka guriga, marka dibaajiga aad la soo noqoneyso.

Waa inaad heshaa Rasiid iyo lambarka xereeynta dibaajiga . Haddii aadan helin waxaad la xirriiri kartaa Heyadda Ijaaraadka Deegaanka (RTAda) si aad u hubiso.

Khasab ma ahan Ijaarahu in uu Dibaaji kugu dalaco.

Markii Ijaarku dhamaado ayaad weydiisan kartaa lacagtaadii dibaajiga aheyd in laguu soo celiyo. Waxaa suurto gal ah in Ijaaruhu isku dayo in lacagta qaar uu la haro, Haddiise aadan ogolaanin fursad ayaa kuu furan aad uga doodo sheegashadaas. Eeg qeybta “Soo nooshada lacagtaadii Dibaajiga aheyd ”.

Haddii aad caawimaad uga baahan tahay bixinta dibaaji ama Ijaarka eeg qeybta “caawimad dhaqaale”.

**Ijaarka horumarinta ah**

Milkiile-yaasha iyo Wakiilada Guryaha intooda badan waxey kaa doonayaan inaad bixiso Ijaarka todobaad walba biloowgiisa , labadii todobaad ama bishii.

Haddii aad saxiixday heshiiska mudada go,an laguma weydiisan karo ijaar horumarin ah ee ka badan hal bil. Haddii heshiiskaaga kiradu yahay kan mudada wareegta laguma weydiisan karo in aad bixiso kiro horumarin ah oo ka badan laba todobaad .

Marka aad ijaar kaas bixisid laguma weydiisan karo lacag kale oo kiro ah ilaa waqtiga mudadaasi ka dhamaanmeeyso.

Haddii aad kiradaada ku bixiso cadaan ama jeebga Ijaaruhu waa inuu ku siiyaa Rasiid.

Rasiidyadaada oo dhanna meel xafidan geli si looga tixraaco mustaqbalka.

Haddii si kale aad u bixisana Ijaarahaagu waa inuu diiwaan geliyaa bixinta Ijaarkaaga.

Waa in ay nuqul(koobi) ku siiyaan haddia aad ka dalbato.

Waa faa,iido in aad diiwaan gelin gaar ah u sameysato ijaarada aad bixiso.

♥ Oraah talo ah

Goor walba qaado Rasiid oo diiwaan ku xafid lacag kasta ood bixiso, rasiidyadu waxey cadeynayaan cadadka lacagta aad bixiso haddii lagu murmo.

### ● Warbixinta xaalka soo gelitaanka

Marka aad soo degto, Ijaaruhu wuxuu ku siinayaa warbixin muujineysa xaaladda aad ku soo degeyso guriga iyo faaladeeda.



Haddii aad heshiiska jebiso Ijaaruhu wuxuu ku siin karaa digniin is heshiis saxid ah haddiise aadan hagaajin khaladka 7maalmood gudahood, wuxuu kugu siin karaa digniin ah in aad guurto.

Haddii laguugu digo in aad guurto waa in cinwaanka gurigu ku qornaadaa, taariikhda ijaarku kuu dhamaaneyo, sababta ay u doonayaan in aad u guurto amaba ka soo qaad in ay sabab la,aan doonayaan guuritaankaaga uu saxiixaana Ijaarluhu. Haddiise aysan sidaas aheyn waxaa laga yaabee in aysan digniintu ansax aheyn.

Waa in aad kirada bixisaa ilaa maalinta aad ka guureyso.


Haddii aadan aqbalin digniinta khalad sixidda ama digniinta guuritaanka, isla markiiba (RTA-da) u dirso Digniinta xalka khilaaafka maadaama aad heysato 7 maalmood oo keliya in aad uga jawaabto. Haddii ay degdeg tahay markiiba waxaad toos u aadi kartaa maxkamadda Eedaha yar-yar.

Waxaad weydiisan kartaa caawimaad meelaha lagu xusay dhabarka buuggan yar.

### ● Warbixinta xaalka guuritaanka

Maalmaha kuugu danbeeya kirada waxaad buuxineysaa warbixinta xaalka guuritaanka. Taasoo aad ku qoreyso faallooyin la xiriira xaalka guriga marka aad ka guureysay.

Isku day in aad Ijaaraha kulantaan oo guriga isla fiirisaan oo qofba qeybtiisa ka buuxiyo warbixinta xaalka guuritaanka. Haddii kale foomka uga dir laba koobi Ijaaraha ama Wakiilada guryaha sida ugu dhaqsaha badan ee ay kuugu suurta geleyso marka ijaarku kuu dhamaado.



● **Ka bixista heshiiska kirada mudada wareegta**

Haddii aad dooneyso in aad guurto waa in aad u dirtaa Ijaaraha Digniin ah guuritaankaaga laba todobaad ka hor taariikhda aad damacsan tahay in aad guurto. Ogoow in aad 2 maalmood oo dheeraad ah ugu tala gasho gaarista boostada.

Sababo kale oo aad kirada uga bixi karto ....

Waxaad kirada uga bixi kartaa haddii:

- Uu Ijaarahu jabiyo heshiiskiinna ama ballan ka- bax isdaba-joog ah ku sameeyo heshiiska ijaarashada.
- Meesha oo aan lagu sii noolaan karin.
- Haddii Ijaaraha ama qof kale oo kula degan waxyeello geystay ama ay u muuqato in uu u geysan doono adiga ama martidaada ama hantidaada u sababi karo dhaawac halis ah; ama,
- Haddii Ijaaraha dhaqankiisu noqdo mid xun.

● **Maxaa dhacaya haddii Ijaaruhu doonayo in aad ka guurto?**

Ijaaruhu iskama kaa rari karo isagoon digniin macquul ah ku siin.

Haddii Ijaarkaagu yahay kan mudada wareegta ah waa in uu ku siiyaa digniin laba bilood ah oo qoraal ah.

Haddiise kiradaadu tahay tan mudada go,an oo ay dhamaaneyso, waa in Ijaarluhu ku siiyaa digniin laba todobaad ah oo qoraal ah oo aad uga guurto laakiin kuma oran karo guur inta mudada ijaarku ka dhamaanaayo.

Ijaaruhu kaama rari karo ilaa mudadu kuu dhamaato, in aad heshiiska jabisay mooyaane, ama xaaladaha qaar aan la dhaafi karin, sida: culeys saa, id ah; meesha oo aan lagu sii noolaan karin; Ijaartaha oo u sababa waxyeello weyn guriga, ama dhaqammo xun.

Ka dib adiga ayey kuu taalaa in aad ku darto faalladaada ( khasab ma ahan in aad ku raacdo Ijaaraha tiisa) Tusaale ahaan, haddii bar wasakheed aan fuqeyn ay hore ugu taaley katiifadda, ama musqushu si hagaagsan u shaqeynin, waa in aad foomka ku calaamadisaa.

Waxaad heysataa 3 maalmood in aad foomka ku buuxiso oo ugu celiso Ijaaraha.

Haddii ay kugu adkaato buuxinta foomku taageero ka raadso mid ka mid ah meelaha ku yaalla dhabarka buugan yar.

● **Waxyaalaha ugu horeeya ee leyska hubiyo marka aad soo degto**

Ma heysataa:-

- Furaha meesha
- Heshiiska Ijaarka ama cahdiga
- Rasiidyada-dibaaajiga iyo kiro bixinta
- foomka lagu xereyey dibaaji- in loo diray heya,adda Ijaaraadka deegaanka.
- Warbixinta xaalka marka aad soo degeyso
- Bayaanka macluumaadka- waxaa ku cad xuquuqda iyo masuuliyadda Ijaartaha (sharcigu wuxuu dhigayaa in qofka kaa Ijaaray uu mid ku siiyo)

♥ Oraah talo ah


Dukumintigaaga oo dhan sida Heshiiska Ijaarka , warbixinta xaalka guriga iyo rasiidyada ku keydso meel xafidan. Waxaa dhici karta in aad ka faa,iideysayo haddii wax khilaaf ihi dhaco inta ijaarkaagu socdo.

## 5 Inta meesha Ijaarkeedu kuu socoto.

### ● Yaa ka masuul ah?

Bilowga kiradaadaba, Ijaaruhu waa inuu xaqiijiyaa in meeshu nadiif tahay, dayactir wanaagsan leedahay oo ay diyaar kuu tahay in aad kusoo guurto. Inta kirada kuu socoto waa iney sameeyaan wixii dayactir ah oo ay ka taxadaraan Isticmaalka guud sida Jaranjarooyinka, marinka guriga ama barsadda.

Qofka Kaa Ijaaray waa in uu xaqiijiyaa in meeshu(hoyga) amaan tahay, qataarada oo dhan si hagaagsan u shaqeynayaan oo uu ku siiyo furayaasha qataarada.



Inta kirada aad ku jirto waa in aad si macquul ah meesha uga taxadartaa ijaarkana waqtigiisa ku bixisaa. Haddii adiga ama martidaadu waxyeello gaarsiisaan hoyga waxaa leydinka doonayaa in aad dayactirtaan waxyeelada. Haddii aad dooneyso in wax uun aad ka bedesho hoyga, tusaale ahaan: iskifaallo/marfish aad ku xirto ama qol rinjiyeyn. Waxaad u baahan tahay in aad ogolaasho qoran ka hesho Ijaaraha ama wakiilka guryaha. Ogolaashahan waxaa kale oo uu khuseyaa haddii aad xayawaan heysaneysid.

- Qiimaha kirada inta qof kale soo degayo ama inta heshiiska kiradu ka dhamaanayso. (waxaa waajib ku ah Ijaaraha in uu sida ugu dhaqsiiyaha badan ku helo Kireyste cusub)
- Kharajka xayeysiinta
- Kharajka dib u ijaaridda (Haddii Ijaarluhu uu siinayo wakiilka guryaha oo keliya)

Waxey u badan tahay in lacagtan ay ka gostaan dibajigaaga laakiin waa suurto gal in ijaarluhu kugu sheegto lacag taas ka sii dheeraad ah.

Haddii aad dooneyso in sida ugu dhakhsiiyaha badan aad uga baxdo heshiiska ijaarka kirada mudada go,an.:

- Isku- day in heshiis aad la gaarto Ijaarlaha. Oo xaqiijina in uu qoran yahay cadeynayana marka aad guureyso iyo taariikhda ugu danbeysa ee aad bixineyso kirada.

AMA

- Qof kaala wareega keen oo booskaagii heshiis cusub la saxiixda.

AMA

- Codsi u diro maxkamadda Eedaha yaryar (SCT) si aad hore uga guurto, “dhibaato xad dhaaf ah “ oo kugu timi awgeed. Tusaale ahaan: Shaqadii oo lagaa eryay ama jirro khatar ah oo ku haysa, ama sababo kale oo wanaagsan oo aadan halkaas u deganaan karin. Waa in aad cadeysaa.

## 6 Miyaad ka guureysaa deegaankaaga?

*Heshiiska mudada go,an-* Marka heshiiska leeyahay biloow cad iyo taariikh dhamaad

*Heshiis mudada wareegtada ah-* Marka heshiisku leeyahay biloow cad laakiin uusan laheyn taariikh dhamaad.


*Deegaamo badan ayaa ku biloowda heshiiska mudada go,an. Marka mudadaasi dhamaato hase yeeshee aad sii degenato meesha ijaarkaagu wuxuu noqonayaa mig wareega.*

### ● Ka bixista cahdiga kirada mududada go,an

Haddii aad dooneyso in aad guurto marka kirada heshiiska mudada go,an kuu dhamaaneyso, waxaad bixineysaa 14-maalmood oo digniin ah adigoo diraya ogeysiiska guuritaankaaga inta aan heshiiskaagu dhamaan. Taariikhda aad guureysaana waa in aysan noqonin ka hor taariikhda dhamaadka cahdiga kirada.

Qaanuunka guud waa in aadan ka guuri karin kirada mudada go,an leh taariikhda dhamaadkeeda ka hor.

Haddiise aad hore u guurto ama aad jebiso cahdiga kirada, Ijaarluhu wuxuu kugu sheegan karaa:



Ijaarluhu waa in uu xaqiijiyaa in ay suurto gal kuu tahay in aad gurigaaga ugu raaxaysato si nabadgelyo ah oo degan. Waxaad xaq u leedahay in dad kuu soo martiyo ama kula habeen dhaxo hase yeeshee waa in aad ogoaasho qoraal ah ka heshaa Ijaaraha haddii aad dooneyso in ay kula soo degaan oo kula noolaadaan.

Waa in aad bixisaa kharajka soo xiritaanka iyo isticmaalka gaaska, korontada iyo taleefoonka haddii aad qalabka lagu cabiro adeegyadaas leedahay. Haddii aadan mitirka lagu cabiro laheyn oo adeegyadaas aad la wadaagto Ijaaraha ama kireystayaal kale, waxaa keliya oo masuul aad ka tahay qeybta kharajkaaga, haddii ay ku qoran tahay heshiiska deegaanka. Ijaarluhu waa inuu bixiyaa ujrooyinka kale sida saamiga dhul-leyda, Canshuuraadka iyo qiime biyo oo macquul ah.


Haddii dhibaato kaa heysato adeegyada lagugu soo dallacday, la xiriir meelaha liiskoodu ku taxan yahay qeybta “Xageed ka heli kartaa caawimaad dheeraad ah”

### ♥ Oraah talo ah

Haddii aad gaar u leedahay mitirka biyaha lagu cabiro, ku diiwaan geli saacadda tirada ku qoran warbixinta xaalka guriga marka aad soo degto iyo sidoo kale marka aad guureyso. Ka dib waxaad qiyaas sugan ka qaadaneysaa inta aad biyo isticmaali jirtey, hadii Ijaar-qaatuhu isku dayo in uu kugu dalaco isticmaalka biyaha dheeraadka ah.

- **Gooni ahaanshahaaga, iyo haddii Milkiilu-hu doonayo inuu soo booqdo hoyga.**

Waxaad xaq uleedahay meesha raaxadeeda oo deganaansho iyo xisilooni leh. iyo hadana xaq-dhowrka arimaha kuu gaarka ah. Waa sharci darro in Milkiilu-huhu soo galo hoygaaga adigoon u ogolaanin amase qoraal Ogeysiis ah aadan hore ugu helin.



Muddada ogeysiiska imaatinku wuxuu ku xiran yahay ujeedada booqashada. Waa in lagu siiyaa ogeysiis 24 saac ah, ulajeedooyinka dayactirka ama tusidda hoyga iibsadayaal ama Ijaartayaal laga rajo qabo, sabab baaritaanna 7maalmood oo hore lagu sii ogeysiiso.

Haddii aad u aragto in waqtigu uusan suurto gal aheyn waxaad isku dayi kartaa in aad kala xaajooto waqti kaga sii haboon oo ay soo booqdaan. Haddii Milkiile-hu uu soo galo isagoon ku soo ogeysiin waxaad cabasho usoo gudbin kartaa heya, adda Ijaaraadka Deegaanka RTAda ama u dir Mulkiilaha Digniin aad ku wergelineyso wanaag jebinta. Eeg qeybta “Khilaafka Ijaaraadka”.

- **Dayactirka degdegga ah**

Sharciga Queensland wuxuu qeexayaa waxyaalaha loo cuntiraafsan yahay dayactirka degdegga ah, tusaale ahaan. Butaaca biyaha kulul, musqusha oo Gufoowda, gaaska oo daata iyo kuwo kale.

Heshiiskaaga deegaanka ayaa qoraya halka aad kala xirreyso dayactirka degdegga ah, sida caadiga ah waa Ijaarqaataha, tuubiistaha ama koronto yaqaanka.

Haddii aad heli weydo dadka u qaabilsan Ijaaraha, waxaad ugu yeeri kartaa qof xirfad u leh in uu hagaajiyo, Laakiin marka hore waa in aad si dhab ah isugu daydaa helitaanka kuwa loo xil-saaray.


Inta aadan sameynin soo samee ugu yaraan laba qiimeyn oo kala duwan oo kan raqiisan qaado. Rasiid ka qaado shaqada la qabtay oo dabadeed ijaaraha weydiiso in lagu soo celiyo adigoo tusaya lacagtii lasoo dalacay iyo rasiidkaba.

Haddii Ijaarluhu diido inuu kuu soo celiyo dabeed waxaad dalab deg-deg ah u dirsan kartaa Maxkamadda Eedaha yar-yar (SCT) si lacagtaadii laguugu soo celiyo.

♥ **Oraah talo ah**

Ha joojin lacagta ijaarka adigoo is leh ka gooso lacagtii dayactirka. Waxey noqoneysaa sabab ijaarluhu uu kaaga saaro deegaanka.

3. Haddii todobadii maalmood ka dib weli aysan sameynin, waxaad u dirsan kartaa codsi xal ka gaaris ah hey'adda Ijaaraadka degaanka . RTADu waxey isku deyi doonaan in heshiis arinka aad ka gaataan adiga iyo Ijaarluhu. Haddii dhibaatadu halis tahay waad ka bixi kartaa deegaanka adigoo uga digaya guuritaanka aad damacsan tahay, laakiin Inta aadan sidaas yeelin talo u doono meelaha liiskoodu ku taxan yahay qeybta “ Halka aad ka heli karto caawimaad dheeraad ah”.
4. Haddii arintaan aan heshiis lagu dhameynin waxaad heli doontaa ogeysiin ku saabsan Khilaafka aan la xallin dabeed waxaad codsan kartaa in looga fariisto Maxkamadda Eedaha yar-yar (SCT) si aad u hesho xukun ah in dayactirka la sameeyo ama Ijaarka la dhimo.



### ● Marka aad dad kale la wadaageyso


Guri wadaaggu waa arrin iska caadi ah Australia. Guri wadaaggu waa marka aad la degto dad kale kuwaas oo lama-huraan aaney aheyn in ay goyskaaga yihiin oo aad qeybsataan kharajyada ijaarka iyo waxyaabaha kale ee lasoo dalaco oo masuuliyadda guriguna idinka dhexayso.

Haddii aad heshiiska guriga la saxiixdo dad kale dabeed waxaad tiihin wada-Ijaartayaal.

Mid kasta oo idinka mid ah wuxuu mas,uul ka yahay in uu wajjibka heshiiska degaanka uu ka soo baxo, ijaarka waqtigiisa bixiyo oo meeshana ka taxadaro.

Haddii aadan saxiixin heshiis waxuu xilkaaga xagga sharciga saaran yahay Ijaartayaasha kale ee saxiixay heshiiska Ijaarka.

Guri-wadaaguhu si kastaba ha ahaatee lacagta Dibaajiga waa uu ku darsadaa. Haddii ay heshiiska ku qoran yihiin iyo haddii kaleba waa in ay saxiixaan foomka lagu xereeyo lacagta Dibaajiga.



Si aad u sheegato oo aad dib ugu hesho lacagtaadii Dibaajiga aheyd fiiri qeybta ah “ Sida ay lacagtaadii carbuuntu kuugu soo noqon karto”

Haddii wax iska bedelaan sida lacagta dibaajiga loo kala leeyahay waa in kuligiin aad buuxisaan oo saxiixdaan foomka bedelaadda heshiiska lacagta dibaajiga ee Heya,adda Ijaaraadka Deegaanka.

### ● Haddii aad bixinta Ijaarka dib ula dhacdo.

Haddii sababo awgood ay kugu adkaato in aad kirada ku bixiso waqtigeeda, la socodsii Ijaaraha oo heshiis isla gaara si aad ku bixiso ijaarka.

Haddii aad 7maalmood dib kaga dhacdo bixinta ijaarkaaga waxaad ku jirtaa kiro deyn ah. Wuxuu Ijaaraha gurigu kuu soo gudbin karaa Digniin in aad wanaaggii jebisay oo ku fareysa inaad Ijaarka ku bixiso 7 maamood gudahood.

Haddii aad kirada ku bixin weydo muddo 7 maalmood gudahood ah Ijaaruha wuxuu awoodaa in uu qoraal ogeysiis kugu weydiisto in aad guurto taas oo cadeyneysa in aad heshiiskii jebisay oo kula socodsiineysa inaad ka baxdo guriga . Haddii aad guriga ka guuri weydo Ijaarluhu wuxuu ka dalban karaa Maxkamadda Eedaha yaryar (SCT) amar aad ku guurto.

Haddii aad awooddo dib u bixinta kirada ka dib marka aad hesho digniinta guurista, waxaad weydiisan kartaa Ijaarlaha in uu ka noqdo digniinta. Si aad usii degenaato, laakiin khasab maahan in ay kaa ogolaadaan. Haddii ay ogolaadaan ka noqoshada digniinta qoraal waa in aad ku heshaa heshiiskaas.

♥ Oraah talo ah  
Haddii saddex jeer ijaar daalac laguugu yeesho laba sano gudahood oo Ijaarahu laba jeer durbaba ku siiyey digniinta wanaag ka bixidda dabeed waxey aadi karaan maxkamad si ay kaaga raraan (guriga).

### ● Ijaar Kordhinta

Haddii cahdiga ijaarkaagu yahay kan mudada wareegta Ijaarqaatuhu waa inuu ku siiyaa 2bilood oo digniin ah ka hor inta kirada la saa,idiyey aysan bilaaban. Haddii cahdiga deegaankaagu yahay kan mudada go,an leh kirada lama kordhin karo in heshiiska sidaasi ku qoran tahay mooyaane. Haddii cahdigu sheegayo in la kordhin karo dabeed waa in Ijaarqaatuhu ku siiyaa 1bil oo digniin ah inta ijaarka la saa,idiyey uusan bilaaban. Haddii taariikh lagu xusay heshiiska dabeed taas baa laga yaabaa in ay tahay mid ogeysiis ku filan.

♥ Oraah talo ah  
Cahdiga kirada mudada wareegta ah waxaad u heysataa 30 Maalmood in kirada la kordhiyey aad ugu dooddo heya,dda ijaaraadka degaanka. Cahdiga mudada go,anna waa in aad gudbisaa inta aan heshiiskaagu dhamaanin.

### ● Maxaa laga yeelaa dayactirka

Marba haddii adiga ama martidaadu aysan geeysan waxyeelada, Ijaarqaataha ayaa masuul ka noqonaya dayactirka . Waa in aad–

1. U sheegtaa Ijaaraha dhibaatooyinka dayactirka isla marka aad ogaataba.
2. Haddii ay wax ka qaban waayaan waxaad u diri kartaa digniin in wanaaggii ay jebiyeen ijaarlayaasha adigoo siinaya in 7 maalmood ay ku sameeyaan waxa haleysan.